


Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta Soo-jeedinayaa

Mucjisooyinkii Ciise



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: E. Frischbutter; Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2024 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.


1

Ciise mucjisooyinnbadan buu sameeyey. Mucjisooyinka
waxay calaamad u ahaayeen oo muujanayeen inuu Ciise
runtii yahay Wiilkii Ilaah. Mucjisadii ugu horreysay
waxay ka dhacday xafadii arooska. Arrin dhib leh
baa dhacday. Meeshii baa ka dhamaatay sharaabkii
biyahay canabka ahaa
qof walba.




2

Maryan, Ciise hooyadii, waxay u sheegtay dhibaata, deedna waxay u sheegtay shaqaalihii inay yeelaan waxa uu ku amray Sayidka.



3

"Ashuumaha biyo ka buuxiya," ayuu yidhi Ciise. "Biyo" u badi iney weddiyeen. Haa, biyo, ayuu Ciise ayuu ka codsaday.




4

Deedna Ciise shaqaalihii qaada ashoonkan weyn oo u geeya ninka ka mas'uulka ah xafladda ha dhadhamiyee. Biyihii waxay isku bedeleen sharaab canab ah oo aad u wanaagsan!



5

Shaqaalihii amakaageen. Ciise biyihii wuxuu u bedelay sharaabka canabka Ilaah keliya ayaa samayn kara mucjisdan.




6

Ciis wuxuu soo bandhigay mucjisooyin kale oo fara badan. Habeen baa, Isaga iyo xertiisii tageen gurigii Butros. Bitros soddodii aya aad u xanuunsanayd oo qandhanayd.



7

Ciise wuxuu taabtay gacantii Islaantii bugtay. Durbadiiba wey bogsootay. Wayna toostoo waxay u adeegtay Ciise iyo xertiisii.



8

Waxay u ekeyd dadkii magaaladii oo idil ay isugu yimaadeen afaafkii hore ee aqalkii habeenkaa.

Dad wad buka ayaa yimid - indhoole, dhagoole, kuwa aan hadli karin, curyaaniinba. Xitaa dad jiniyo qaba ayaa ku soo xoomay Ciise. In badan wuu caawiyey.



9

Ciise Wiilkii Ilaah, wuu karaa inuu ku caawiyo. Ciise in badan buu caawiyey. Dhssmsn intii u timid o idil wuu bogsiiyey. Dadkii curyaanmada ku dhashay oo nolosha weligood curyaan ahaa wey socdeen oo boodboodeen.



10

Qaar kale ayaa u yimid, kuwii uu foolxumeeyey oo cudurka baraska qabay.



11

Waxay noqdeen Giddigoodba daahir hadba sidii uu Ciise ku bogsiiyey.



12

Rag iyo dumar ay dhibeen jiniyo ayaa Ciise hor yimid. Wuxuuna ku amray jiniyadii inay ka baxaan. Wey yeeleen jiniyadii, dadkii cabsanayay, oo farxad darrada haysatay baa degenaan iyo faraxad helay.




13

Dadkii buuqyay gadaashoodada, afar nin baa isku dayayay iinuu Ciise caawiyaan saaxiibkooda. Laakiinse maysan jirin meel ay u soo maraan. Maxay samayn karaan?



14

Iyaga oo sare u sida ayay dusha
aqalka ninkii la soo fuuleen, afartii
nine e iimaanka lahaa
saaxiibkood bay xagga
hoose ula soo dejiyeen.
Iminka aad buu ugu
u dhaw yahay
Ciise.




15

Ciise wuxuu arkay
in afartan nin
iimaan leeyihiin.
Ninkii bukeyna
wuxuu ku yidhi,
"Dembiyadaadii
waa la cafiyey,"
Ninkii wuu
istaagay,
caafimaad
iyo xoog. Ciisa
ayaa boksiiyey.



16


Inyar ka dib, Ciise dooni buu la fuulay xertiisii.
Duufaan cabsi leh baddii buu
ku soo kacay, Ciise wuu iska
hurday. Xertiyo cabsi la
gariiraya ayaa hurdada
ka kicisay Isaga.
"Rabbiyow na badbaadi,"
bay ku dhawaaqayeen.
"Waan baaba'nay."



17

Ciise amar buu siiyey mowjadihii. Durbadiiba,
baddii way degtay. "Wa'ayo ninkan noocan ah?"
sidaa bay qalbiga iska weyddiiyeen. Xitaa
dabayshii iyo baddii ay adeecayaan.
Waxayna rumeysteen inuu
yahay Ciise Wiilka
Ilaah sababta oo ah
mucjisooyinkiisii baa
tusay Amaantiisa.
Taasi xertii ma aysan

garanayn, laakiin waxay
arkayeen bandhigyadii
Ciise xitaa ka weyn
mucjisooyin ee uu
dadka ugu adeegayay.



18

Mucjisooyinkii Ciise

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 8-9, Markos 1-2, 4
Luukos 4, 8, Yooxanaa 2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiya." Sabuurka 119:130

19

Dhammaad

40

60

20

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysantahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad ugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16